



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

SHARCI LR.012
OGOLAANSHO ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA HAY'ADDA
SOCDAALKA IYO JINSIYADDA SOOMAALIYEED

Taariikh: 20 Maarso 2023

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

- MARKUU ARKAY:** Qodobka 87^{aad}, Faqradda 1^{aad} iyo Faqradda 2^{aad} iyo 85^{aad} ee Dastuurka KMG.
- MARKUU ARKAY:** Qodobka 90^{aad}, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.
- MARKUU ARKAY:** Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka XGGSH/0233/B11/23, ku taariikheysan 14/03/2023, kuna saabsan **Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed.**
- MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:

Qodobka 1^{aad}

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed.

Qodobka 2^{aad}

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.



Madaxweynaha J. F. S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud





Federal Republic of Somalia
House of the People
Office of the Speaker

Tix: XGGSH/ 0233/B11/23:الرقم

Mogadishu, Maarso 12, 2023 التاريخ

Ku: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

**Ujeedo: Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka
Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed.**


M.ne Madaxweyne;


Waxaan si waafaqasan Qodobka 82aad Faqaradda 3aad ee Dastuurka KMG halkan kuugu soo gudbinaynaa Nuqulka Rasmiga ah ee Hindise Sharciyeedka Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed oo Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare mid walba gaarkiisa u soo ansixiyey.

Hindise Sharciyeedka *Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed* wuxuu Golaha Shacabka soo gaaray taariikhdu markay ahayd *Janaayo 14, 2023* wuxuuna maray dhammaan habraacyada kala duwan ee akhrinta 1aad, 2aad iyo 3aad. Golaha Shacabka wuxuu si waafaqsan Qodobka 82(1)(a) ee Dastuurka KMG ansixiyey hindisahan *Febraayo 18, 2023*, isla *Febraayo 19, 2023* waxaa loo gudbiyey Golaha Aqalka Sare si ay waajibaadkooda Dastuuriga ah uga gutaan. Golaha Aqalka Sare wuxuu dhankiisa ku ansixiyey isla nuqulkii Golaha Shacabka oo aan waxba laga beddelin si waafaqsan Qodobka 82(2)(a) ee Dastuurka KMG, waxayna dib ugu soo celiyeen Golaha Shacabka *Maarso 11, 2023*.

Haddaba, M.ne Madaxweyne, waxaan si waafaqasan Qodobka 90(f) ee Dstuurka KMG kaaga codsanaynaa in aad *Hindise Sharciyeedka Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed* ku meelmariso Xeer Madaxweyne, si loogu soo saaro Faafinta Rasmiga ah una noqdo sharci, si waafaqsan Qodobbada 84aad iyo 85aad ee Dastuurka KMG.

Naga Guddoon salaan qiimo badan.



M. ne Sheekh Aadan Maxamed
Guddoomiyaha Golaha Shacabka



- Ra'iisul Wasaaraha Xukuumada Federaalka.
Og. Guddoomiyaha Aqalka Sare.
Og. Garyaqaanka Guud ee Dawladda.
Og. Hantidhowrka Guud Qaranka.
Og. Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka.
Og. Waaxda Shuruucda Golaha Shacabka.

SHARCIGA HAY'ADDA SOCDAALKA IYO JINSIYADDA SOOMAALIYEED


Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS




M. ne Sh. Aadan Maxamed Nuur "Madoobe"




Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad Golaha Shacabka BJFS



Marwo Sacdiya Yaasin Xaaji Samatar



Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad Golaha Shacabka BJFS



M. ne Cabdullahi Cumar Abshir "Abshirow"

Jamhuriyada Federaalka Soomaaliya
Aqalka Sare
Xafiiska Guddoomiye ku
Xigeenka Koowaad



جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشيوخ
مكتب نائب الرئيس الأول

Federal Republic of Somalia
The Upper House
Office of The First Deputy Speaker

Ref: XGK1/16/B11/2023 الرقعة:

Taariikh: 11/3/2023 التاريخ:

Ku:- Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS
Og:-Guddiga Amniga iyo Difaaca Aqlka Sare e BFS
Og:- Wasaaradda Amniga Gudaha X.F.S.
Og:- Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda
Og:- Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

=Muqdisho=
=Muqdisho=
=Muqdisho=
=Muqdisho=
=Muqdisho=

Ujeedo:

Soo Gudbin Qaraar Gole (Ansixinta Sharciga Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed)

Mudane Guddoomiye,

Salaan diirran kadib, waxaan kuu soo gudbinayaa Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee tirsigiisu yahay Tix: GAS/B-11/KF2/3/2023 kuna taariikheysan 8 Maarso 2023 kuna ansixiyay Goluhu Sharciga Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed:

- Waxaa fadhiyay 28 Senatar.
- Waxaa oggolaaday: 27 Senatar.
- Waxaa diiday: 0 Senatar.
- Waxaa ka aamusay: 0 Senatar.

Sidaas darteed, Mudane Guddoomiye, waxaa halkan ku lifaaqan Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee kor ku xusan iyo nuqulka sharciga uu Goluhu soo ansixiyay si aad uga gudataan waajibka dastuuriga ee la idiin igmaday.

Iga guddoon qadarin.

[Signature]



Sen. Cali Shacbaan Ibraahim
Ku Xigeenka 1^{aad} Ahna Kacimaha
Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya






**ANSIXINTA SHARCIGA HAY'ADDA SOCDAALKA IYO
JINSIYADDA SOOMAALIYEED**

Senatarrada Fadhiyay	Oggolaaday	Diiday	Ka Aamusay
28	27	0	0

**Guddoomiye Ku-xigeenka Koowaad ee Golaha Aqalka Sare
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**


Sen. Cali Shacbean Ibraahim


Taariikh: 8 Mar, 2023

**Guddoomiye Ku-xigeenka Labaad ee Golaha Aqalka Sare
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**


Sen. Cabdullaahi Cali Xirsi

Taariikh: 8 Mar. 2023

**Ku-xigeenka Xoghayaha Guud ahana ku-simaha Xoghayaha Aqalka Sare
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**


Cabdullaahi Xaaji Geedi

Taariikh: 8 Mar, 2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA



**GOLAHA AQALKA SARE
BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**QARAAR GOLE
ANSIXINTA SHARCIGA HAY'ADDA SOCDAALKA IYO
JINSIYADDA SOOMAALIYEED**

**Muqdisho,
8 Maarso, 2023**

1

Tix: GAS/B-11/KF2/3/23
Kalfadhiga 2^{aad}
Kularkiisa 21^{aad}

Taariikh: 8 Maarso, 2023

**GOLAHA AQALKA SARE EE BAARLAMAANKA FEDERAALKA
SOOMAALIYA**

MARKUU AKHRIYAY:

Sharciga “Hay’adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed oo ay nuqulkiisii kowaad soo curisay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya uuna soo ansixiyay Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya soona gaaray Golaha Aqalka Sare 21st Febberaayo 2023 si uu uga guto waajibka dastuuriga ah ee loo igmaday.

MARKUU ARKAY:

Qod.82^{aad} iyo Qod.83^{aad} ee Dastuurka KMG ah iyo Qod.49^{aad} iyo Qod.50^{aad} ee Xeer Hoosaadka Golaha Aqalka Sare.

MARKUU ARKAY:

Qod.61^{aad} (1) (3) ee Dastuurka Ku Meel Gaar-ka ah.

MARKUU TIXGELIYAY:

Soo jeedinta in Sharciga Hay’adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed loo ansixiyo sida uu uga soo gudbay Golaha Shacabka ee B.F.S.

MARKUU GAROWSADAY:

In danta guud ee Dalku ku jirto in la meel mariyo Sharciga Hay’adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed.

ISAGA OO KU KULANSAN:

Kalfadhiga 2^{aad}, kulankiisa 21^{aad}, oo ay soo xaadireen
28 Senatar (Labaatan yo sideed Senator).


WUXUU GUDDOONSADAY QODOBADA HOOS KU XUSAN:

Qod.1^{aad}

Golaha Aqalka Sare wuxuu cod aqlabiyad leh ku ansixiyay Hay'adda Socdaalka iyo
Jinsiyadda Soomaaliyeed isaga oo aan waxba ka beddelin.

Qod.2^{aad}

Qaraarka Golaha Aqalka Sare waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacabka ee
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya; si uu uga guto waajibka dastuuriga ah ee loo
igmaday.



Sen. Cali Shacbaan Ibraahim
Ku Xigeenka 1^{aad} Ahna Ku simaha
Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya



The Federal Republic of Somalia
Upper House
Committee for Defense and Security

Taariikh: 08 Maarso, 2023

Ku: Guddoonka Golaha Aqalka Sare

Ku: Xubnaha Golaha Aqalka Sare

Ujeeddo: Soo-jeedinta Warbixinta Akhrinta 3aad ee Hindise-sharciyeedka
Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed

Mudane Guddoomiye,
Senatorrada sharafta leh,

Hindise-sharciyeedka Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed oo uu Golaha Shacabku Soo ansixiyay wuxuu Aqalka Sare soo gaaray 21^{kii} Febraayo 2023, iyada oo Wasaaradda Amniga Gudaha ee XFS ay akhrinta koowaad ka hor akhrisay Aqalka Sare 22^{kii} Febraayo 2023.

Guddoomiye Ku xigeenka Golaha Aqalka Sare ahna ku simaha Guddoomiyaha ayaa si rasmi ah Hindise-sharciyeedka ugu wareejiyay Guddiga Amniga iyo Difaaca Aqalka Sare ee B.F.S.22 Febraayo 2023, sida uu qabo qodobka 45^{aad} ee Xeer-hoosaadka Golaha Aqalka Sare.

Guddigu wuxuu Hindise-sharciyeedkan akhrintii 2aad ka hor akhriyay Aqalka Sare 6 Marso, 2023, iyada oo senatorrada sharafta leh ay soo jeediyeen talooyin wax ku ool ah.

Guddigu wuxuu dhegeystay talooyinkii iyo soo jeedinnadii wax ku oolka ahaa oo ay Sanatorradu u soo gudbiyeen Guddiga.

Waxaan halkan idinkaga soo gudbineynaa soo jeedinnada qaar ka mid ah senatorrada oo la xariira hindise-sharciyeedka Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed.

Sen. Maxamed Cali Yuusuf Gaagaab, Sen. Maxamed Cusmaan Xareed, Sen. Duniyo waxay ka hadleen arrin muhim ah oo u baahan in lagu xalliyo sharciga baasaboorka.

Sharcigan kama hadlayo sida baasaboortu lagu qaadanayo sida lagu cusboonaysiinayo balse, wuxuu dhisaya Hay'addii bixin laheyd adeegyada ay sanatorradu sheegeen.

Sen. Maryan Faarah waxay ka hadashay miisaaniyadda Hay'adda iyo cidda u gudbinaysa Wasaaradda Maaliyadda.

Hay'addu waa hay'ad u madaxbannaan hawlaheeda waxayna gudubsaneysay miisaaniyaddeeda wax ka badan 10 sano.

Sidoo kale, waxay senator Maryan ka hadashay qodobka 21aad ee ka hadlaya waayidda xubinnimada, wuxuuna dhigayaa in uusan hay'adda xil ka qaban karin qof ay maxkamadi xakuntay shantii sano ee ugu dambaysay.

Waxaa loola jeedaa arrintan in uusan qofku xil qaban karin ila ay ka soo wareegto 5 sano xukunkii ku dhacay.

Qodobka 28aad oo ka hadlaya Wasiirka Wasaaradda waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha XFS, sida ku xusan eray-bixinta sharcigan.

Sen. Leylo Nuur Maax waxay ka hadashay Qodobka 8aad oo ka hadlaya heysashada hubka fudud iyo qodobka 9aad oo ka hadlaya sugidda amniga hay'adda.

Hubka fudud ee Hay'adda waa mid ay saraakiil dharcad ah ay ku heysanayaan gudaha goobaha hay'adda ama ay isku ilaalinayaan qaar ka mid ah madaxda Hay'adda sida bastooladaha ku waas oo ah hub sharciyeysan oo ay wataan Agaasimeyaasha Hay'adda, halka ay Boolisku bannaanka ka joogaan hay'adda ama ay gaafwareegayaan bar-xuduudeedka Dalka.

Sidoo kale, senator Leylo, waxay sheegtay in diiwaangelinta qoxootiga loo daayo hay'adda Qaxootiga iyo barakacayaasha.

Marka ugu horreysa ee qaxooti Waddanka soo galo cidda koowaad oo arkaysa waa Hay'adda Socdaalka, sidaas darteed, iyada ayaa u gudbineysaa hay'adda Qaxootiga iyo barakacayaasha, si ay u diiwaangaliyaan.

Senatorrada sharfta leh,

Ugu dambeyn, waxaan si qaddarin iyo iyo xushmad ku dheehan tahay idinkaga codsanaynaa in aad Hindise-sharciyeedka ku aqbashaan kuna ansixisaan sida uu yahay.


Mahadsanidiin.

Xubnaha Guddiga

1. Sen.Aadan Cabdinaasir Maxamed
2. Sen.Maxamuud Maxamed Cabdinuur(Garabeey)
3. Sen.Maxamed Cabdi Cismaan (Majiino)
4. Sen.Ilyas Beddel Gabboose
5. Sen.Ahmed Maxamed Cali (Afcadey)


Sen.Aadan Cabdinaasir Maxamed
Guddoomiyaha Guddiga





Somali Federal Republic
The House of the People
Office of the Speaker

Ref: XGGSH/

الرقم: /B-11/23

التاريخ: Mogadishu, February 19, 2023

- Ku: Guddoomiyaha Aqalka Sare.
Og: Madaxweynaha Jamahuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
Og: Ra'iisal Wasaaraha Xukuumada JFS.
Og: Wasaaradda Maaliyadda.
Og: Garyqaanka Guud ee Dawladda.
Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka.
Og: Waaxda Shuruucda ee Golaha Shacabka.

**UJEEDO: ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA HAY'ADDA
SOCDAALKA IYO JINSIYADDA SOOMAALIYEED**

Mudane Guddoomiye,
Mudanayaal,

Waxaan halkaan idinkugu soo gudbinayaa, si aad waajibaadkiina uga gudataan Ansixinta Hindise Sharciyeedka Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed. Goluhu wuxuu ku ansixiyay Hindise Sharciyeedkaan kalfadhigiisa 2aad, kulankiisa 20aad taariikhdu markay ahayd 18/02/2023, codayntuna sidaan ayay u dhacaday:

Koramka: 150
Oggol: 149
Diiday: 0
Ka aamustay: 1

Naga guddooma Salaan diiran iyo qadarin gaza

Abdullahi

A

Xil. Cabdullaahi Cumar Abshiroow
Guddoomiyaha Ku Xigeenka 2aad ee Golaha Shacabka BJFS



ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA HAY'ADDA
SOCDAALKA IYO JINSIYADDA SOOMAALIYEED

Tirada Xubnaha Codeysay=150;

Oggol: 149;

Diiday: 0;

Ka Aamustay: 1;

Guddoomiye Ku Xigeenka 2aad ee Golaha Shacabka BJFS

Abdulkadi A

Xil. Abdullahi Omar Abshir

Tar: 19/02/2023

Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka BJFS

M. ne Maxamed Cabdullaahi Cabdi

M. ne Maxamed Cabdullaahi Cabdi - Ciyow

Tar: 19/02/2023



Tixraac:XRW/0039/01/2023

Taariikh: 12/01/2023

Ku: Guddoonka Golaha Shacabka JFS

=Muqdisho=

Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

=Muqdisho=

Ujeedo: -Soo Gudbin "Hindise-sharciyeedka Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed".

Mudane Guddoomiye,


Iyada oo la tix-raacayo Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada summaddiisuna tahay SHGW.00.17.01.23 ee 12/01/2023, kuna saabsan ansixinta "Hindise-sharciyeedka Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed" oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Sidaa awgeed, Mudane Guddoomiye waxa aan halkan idin-kugu soo gudbineynaa "Hindise-sharciyeedka Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed" si aad uga gudataan waajibaadkiina Dastuuriga ah.

waxa aan idinka codsaneynaa in aad fududeysaan ansixinta "Hindise-sharciyeedka Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed" maadaama baahi weyn loo qabo meel marintiisa.

Naga guddooma salaan diirran iyo qaddarin

Mudane. Saalax Axmed Jaamac
Ra'iisul Wasaare ku xigeenka Xukuumadda JFS



JAMHUURIYADDA FEDERAALAKA SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
TAR: 14-1-2023
TIX: 31
SAXIIX: [Signature]

Hala baduys
15/01/2022



Tixraac: XRW/096/01/2023

Tariikh: 12/01/2023

Ku: Dhammaan Xubnaha Golaha Wasiirrada JFS =Muqdisho=
Og: Guddoonka Golaha Shacabka JFS =Muqdisho=
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

Ujeedo:- Go'aan Gole-Ansixin "Hindise-sharciyeedka Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed".

Ra'iisul Wasaare ku xigeenka Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99^{aad} xarfaha (a), (b), (c) iyo (e) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobada 100^{aad} (a) & (d) iyo 101^{aad} ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Warqadda summaddeedu tahay WAG/XWD/O66 /22 ee 20/12/2022, ee codsiga soo jeedinta Wasiirka wasaaradda Amniga Gudaha.

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay SHGW.00.17.01.23 ee 12/01/2023, kuna saabsan ansixinta "Hindise-sharciyeedka Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed" oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Markuu tixgeliyey: Baahida loo qabo in la ansixiyo Hindise-sharciyeedka Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed.


Wuxuu Meel-mariyey:

Qodobka 1^{aad}

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay SHGW.00.17.01.23 ee 12/01/2023, kuna saabsan ansixinta "Hindise-sharciyeedka Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed" oo uu Goluhu ansixiyey.

Oodobka 2^{aad}

In “Hindise-sharciyeedka Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed” si deg deg ah loogu gudbiyo Golaha Shacabka, si ay uga gutaan waajibaadkooda dastuuriga ah.



Salah

Mudane Saalax Axmed Jaamac
Ra'iisul Wasaare ku xigeenka Xukuumadda JFS



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
Ministry of Internal Security
Office of the State Minister

Ref.WAG/XWD/088/22

Tr: 17 December.2022

Ku : Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda
Og : Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha
Og : Ra'iisul Wasaaraha XFS

=Muqdishu=
=Muqdishu=
=Muqdishu=


Ujeedo: Codsii Fududeyn Shuruuc Baarlamaankii 10aad qabyo uga tagay.

Wasaaradda Amniga Gudaha oo tixgalinaysa howlaha baaxada weyn ee Hay'adda Socdaalka Jinsiyadda ay u heyso Qaranka Soomaaliyeed iyo muhimada ay leedahay bisinta adeegyada bulshada, waxaa si xushmad iyo qadarin ku dheehan tahay uga codsanaynaa Garyaqaanka Guud ee Dowladda inuu inoogu gudbiyo Golaha Wasaaradda Nukuumada Fadaraalka Soomaaliya Hindise Sharciyeedka Socdaalka iyo Xeerka Dhismaha Hay'adda oo aad hore ugu gudbisay Nukuumadii hore Taariikhdu markay ahayd 29/10/2019 oo maray labo aspis ee Baarlamaankii 10aad ee JFS, si loo sii dhamaysiro.

Hindise Sharciyeedka Socdaalka iyo Xeerka Dhismaha Hay'adda ayaa ah sidii ay Baarlamaankii 10aad ku aqriyeen laba jeer oo hore waxna lagama badalin, waxaan Garyaqaanka Guud ee Dowlada ka codsanaynaa inuu Nukuumada u cadeeyo in sharciga iyo xeerka HSJ ay yahiiin isla kuwii hore oo baarlamaankii 10aad mariyay labada aspis isla markaana aan waxba laga badalin, sidoo kalena aad xukuumada u soo jeediso in ay meel mariso oo ay xalaaleeyso sharciga iyo xeerka HSJ, kadibna ay u gudbiso Golaha Shacabka JFS, si ay u meel mariyaan.

Hadaba, Garyaqaanka Guud ee Dowladda waxaan ka rajeynaynaa in uu tixgalin doono codsiga Wasaaradda.

Wada shaqeyn wacan,


Xil. Maxamed Cali Xagaa
Kusimaha Wasiirka ahna
Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Amniga Gudaha.



MINISTRY'S ADDRESS: MAKAL-MUKARAMA MAIN ROAD, SHANGANI DISTRICT, MOGADISHU, SOMALIA
Tell: +252-619057777 E-mail: stateminister@mois.gov.so

Dr. Mursal
18.12.2022
✍





THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL

SUMMAD: XGG/305/2022

Ku: Wasaaradda Amniga Gudaha XFS
Og: Agaasinka Hay'adda Soc. Iyo Jinsiyadaha
Og: Agaasimaha Golaha Wasiiradda
Og: Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha XFS

19/12/2022

Muqdisho
Muqdisho
Muqdisho
Muqdisho

Ujeeddo: Soo Gudbin Labo Hindise-sharciyeed

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda asaga oo tixraacaya warqadda summaddeedu tahay REF: WAG/XWD/058/22, kuna taariikhaysan 17/12/2022, kana soo baxday Xafiiska Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Amniga Gudaha, ujeeddadeeduna ahayd, Codsii Fududayn Shuruuc Baarlamaanka 10-aad qabyo ugu tagay.

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda asagoo tix-gelinaayo codsiga Wasaaradda Amniga Gudaha iyo baahida loo qabo labada Hindise-sharciyeed ee kala ah:

1. Hindise-Sharciyeedka Sharciga Socdaalka
2. Hindise-Sharciyeedka Hay'adda Socdaalka & Jinsiyadda.

in loo gudbiyo Golaha Wasiirada XFS sida ku cad codsiga Wasaaradda in ay mareen labo aqris Baarlamaankii 10aad isla markaane aan wax laga badalin.

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda ka dib marka uu darsay Labadaan Hindise-Sharciyeed waxa ugu soo baxday:

1- In Hindise-Sharciyeedka kor ku xusan aysan Wasaaradda Amniga waxba ka badalin, kuna soo celiyeen sidii uu uga yimid Golaha Shacabka sida ku cad Warqadda Wasaaradda.

2- In Hindese-sharciyeedyadani ay ka mid yihiin Hindise-sharciyeedyada mudnaanta iyo hortabinta u leh Xukuumadda Dan Qaran.

Hadaba, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowlada waxa uu soo jeedinayaa:

1- in Wasaaraddu u gudbin-karto Agaasimaha Golaha Wasiiradda si loo dhameestiro wixii uga harsan habraaca Xeer-dajinta.

2- In kaddib marka ay Goluhu meelmariyaan laga codsado Guddoonka Golaha Shacabka in Hindise-sharciyeedyadan laga sii wado halkii ay u jooheen inta aan laga soo celin Golaha Shacabka si loo beeqaamiyo waqtiga.

Xafiiska garyaqaanka Guud waxaa uu ku war-galinayaa Wasaaradda Amniga inay codsiga ay ku soo gudbinayso Hindise-sharciyeedyadan ku soo muujiso qaabka ay u doonayso in loo meelmariyo labadan Hindise-sharciyeed kadib marka ay Golaha Wasiiradda ansixiyaan

Salaan qadarin leh.

Dr. Cusmaan Cilmi Guuleed
Garyaqaanka Guud ee Dawladda



**JUMHUURIYADDA FEDERAALKA
SOOMAALIYA**

**HINDISE SHARCIYEEDKA HAY'ADDA
SOCDAALKA IYO JINSIYADDA
SOOMAALIYEED**



Tusmo

CUTUBKA KOOWAAD: UJEEDDADA, AWOODAHA IYO WAAJIBAADKA HAY'ADDA SOCDAALKA IYO JINSIYADDA SOOMAALIYEED..... 4

Qodobka 1aad: Magaca Sharciga..... 4

Qodobka 2aad: Eray-Bixin 4

Qodobka 3aad: Ujceddooyinka Sharciga 4

Qodobk 4aad: Baaxadda Sharciga 4

Qodobka 5aad: Shakhsiyadda Qaanuuneed ee Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda..... 5

Qodobka 6aad: Astaanta Hay'adda..... 5

Qodobka 7aad: Xarunta Hay'adda..... 5

Qodobka 8aad: Xilalka iyo Waajibaadka Hay'adda 5

Qodobka 9aad: Awoodaha Hay'adda 6

Qodobka 10aad: Sugidda Amniga Shaqada iyo Xarumaha Hay'adda 6

Qodobka 11aad: Howlgalka 7

Qodobka 12aad: Ilaalinta Hufnaanta Shaqo ee Hay'adda 7

CUTUBKA LABAAD: QAAB-DHISMEEDKA IYO HAB-MAAMULKA HAYA'ADDA 7

Qodobka 13aad: Qaab-dhismeedka Hay'adda..... 7

Qodobka 14aad: Shuruudaha Magacaabista Agaasimaha Guud iyo Ku-xigeennada 8

Qodobka 15aad: Magacaabista Agaasimaha Guud iyo Ku-xigeennada 8

Qodobka 16aad: Xilka iyo Awoodaha Agaasimaha Guud..... 8

Qodobka 17aad: Xil ka-qaadista Agaasimaha Guud iyo Ku-xigeennada..... 9

Qodobka 18aad: Xilka iyo Waajibaadka Ku-xigeennada Agaasimaha Guud..... 9

Qodobka 19aad: Waajibaadka U-qeybsaneyaasha Hay'adda Socdaalka 9

CUTUBKA SADDEXAAD: HAWL-WADEENADA HAY'ADDA IYO WAXYAABAHA KA REEBAN 9

Qodobka 20aad: Hawl-wadeennada Hay'adda 9



Qodobka 21aad: Shuruudaha Hawl-wadeennada Hay'adda.....	10
Qodobka 22aad: Xuquuqda Asaasiga ah ee Hawl-wadeenada Hay'adda.....	10
Qodobka 23aad: Waxyaabaha ka Reebban Hawl-wadeenada Hay'adda.....	10
Qodobka 24aad: Anshax-marinta Hawl-wadeenada Hay'adda.....	11
Qodobka 25aad: Waayidda Xubinnimada Hay'adda.....	11
CUTUBKA AFARAAD: MIISAANIYADDA, HANTI-DHOWRKA IYO WARBIXIN	
SANADEEDKA HAY'ADDA.....	11
Qodobka 26aad: Miisaaniyadda Hay'adda.....	11
Qodobka 27aad: Xisaabaadka iyo Hantidhowrka.....	11
Qodobka 28aad: Warbixin Sanadeedka Hay'adda.....	11
CUTUBKA SHANAAD: QODOBO QUBANNE AH.....	12
Qodobka 29aad: Xeer Nidaamiyeyaasha Hay'adda.....	12
Qodobka 30aad: Baabi'in.....	12
Qodobka 31aad: Dhaqangal.....	12
Lifaaqa 1aad: Astaanta Hay'adda.....	13
Lifaaqa 2aad: Warqadda Dal-ku-noqoshada "Go-home".....	14



**CUTUBKA KOOWAAD:
UJEEDDADA, AWOODAHA IYO WAAJIBAADKA HAY'ADDA
SOCDAALKA IYO JINSIYADDA SOOMAALIYEED**

**Qodobka 1aad:
Magaca Sharciga**

Sharcigan waxaa lagu magacaabaa Sharciga Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda (HSJ) Soomaaliyeed.

**Qodobka 2aad:
Eray-Bixin**

- 1) Hay'ad: Waxaa loola jeedaa Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda (HSJ) Soomaaliyeed.
- 2) Wasaarad: Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Amniga Gudaha ee Xukuumadda JFS.
- 3) Wasiir: Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha ee Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS).
- 4) Agaasimaha Guud: Waxaa loola jeedaa Agaasimaha Guud ee Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed.
- 5) Sarkaal: Waxaa loola jeedaa hawl-wadeen ka tirsan Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda oo waajibkiisu yahay fulinta waajibaadka sharci ee Hay'adda.
- 6) Bar-xadduudeed: Waxaa loola jeedaa bar ay dowladda Soomaaliya u asteysay in laga soo galo ama looga baxo dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (Dhul, cir iyo Bad)
- 7) Uqaybsanaha (attachee): Waxaa loola jeedaa Sarkaalka hay'adda ee wakiilka uga ah safaaraddaha iyo qunsuliyadaha.

**Qodobka 3aad:
Ujeeddooyinka Sharciga**

- 1) Sharcigan, waxaa lagu dhisay Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed ee u xilsaaran maamulidda iyo maareynta socdaalka si waafaqsan Dastuurka JFS iyo Sharciyada kale ee Dalka. Hay'addan waxay leedahay Sharciyad Qaanuuni ah.
- 2) Waxaa kaloo Sharcigan lagu caddeeyey awoodaha iyo xilalka Hay'adda, si waafaqsan sharcigan. 3) Hay'addu marka ay gudaneyso xilkeeda waxay u madax-bannaan tahay howlaheeda waxayna u hoggaasameysaa Dastuurka JFS iyo Sharcigan.

**Qodobk 4aad:
Baaxadda Sharciga**

Sharcigan, waxaa lagu maamulayaa Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed oo ah Hay'ad leh awood sharci fulineed, mid maamul iyo siyaasadeed ee arrimaha socdaalka iyo qeybta hay'adda ka khuseysa jinsiyadda, si waafaqsan Sharciyada dalka.



Qodobka 5aad:
Shakhsiyadda Qaanuuneed ee Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda

- 1) Hay'addu, waxay leedahay shakhsiyad qaanuuneed oo ay wax ku dacweyn karto, laguna dacweyn karo, sidoo kalana ay ku gali karto heshiisyo leh awood qaanuuneed oo lagu fududeynayo hawlaha lagama maarmaanka u ah hay'adda, si waafaqsan sharcigan iyo sharciyada kale ee dalka.
- 2) Hay'addu waxay yeelanaysaa Astaan iyo shaabbad u gaar ah.

Qodobka 6aad:
Astaanta Hay'adda

Astaanta Hay'addu, waa gorgor duulaya oo ay ku wareegsan yihiin labo caleemood oo kor ku leh xidig, hoosna uga dhagan gaashaan ku midabeysan calanka JFS, uuna ku qoran yahay magaca hay'adda oo dhammeystiran, sida ku cad lifaaqa laad ee sharcigan.

Qodobka 7aad:
Xarunta Hay'adda

Xarunta dhexe ee Hay'adda waa Magaalo Madaxda JFS ee Muqdisho, waxayna laamo ku leedahay Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka iyo xafiisyo ka hawlgala Safaaradaha iyo Qunsuliyadaha Guud dibedda ee JFS.

Qodobka 8aad:
Xilalka iyo Waajibaadka Hay'adda

- 1) Horumrinta iyo fududeynta dhammaan adeegyada la xiriira socdaalka iyo inta ka khuseyso jinsiyadda;
- 2) Bixinta noocyada dukumentiyada safarka ee dalku leeyahay sida, dal-ku-galka, dal-ku joogga iyo degenaashiyaha;
- 3) Kontoroolka iyo sugidda irridaha dalka laga soo galo, loogana baxo;
- 4) Diwaan-galinta ugu horeysa ee qaxootiga iyo dadka magan-galyo doonka ah, marka ay yimaadaan dalka iyo siinta dal-ku-joog ku meel gaar ah, iyadoo lala wadaagayo xogta hay'adda Qaxootiga Qaranka iyo Barakacayaasha iyo hay'addaha u xil-saaran amniga dalka;
- 5) Hubinta, baarista iyo xaqiijinta dukumentiyada socdaalka ee dadka soo-gelaya ama ka baxaya dhammaan bara- xadduudeedyada dalka;
- 6) Hubinta iyo kaydinta xogta muwaadiniinta iyo ajaanibta;
- 7) Ka-qeyb qaadashada maareynta qaxootiga iyo dadka magangalyo-doonka ah, iyadoo la waafajinayo Dastuurka, Sharciga Qaxootiga dalka iyo shuruucda Caalamiga ah oo ay Soomaaliya qeybta ka tahay;
- 8) Musaafurinta iyo hakinta safarrada dadka, iyadoo fulineysa awaamiir maxkamadeed iyo go'aamadda siyaasadeed ee xukuumadda Federaalka Soomaaliya iyo danta guud ee qaranka



- 9) Caddeynta & Xaqiijinta codsiga jinsiyad siinta Ajnabiga la soomaaliyeynayo iyo Hubinta in uu buuxiyay shuruudaha jinsiyad siinta.
- 10) Ka-hortagga dhammaan dembiyada la xiriira socdaalka iyo jinsiyadda;
- 11) La-dagaallanka dhoofinta aadanaha ee loo maro sifooyin aan sharciga waafaqsaneyn.
- 12) Fulinta shuruucda iyo heshiisyada caalamiga ah ee la xariira socdaalka ee ay Soomaaliya qeybta ka tahay.

**Qodobka 9aad:
Awoodaha Hay'adda**

Awoodaha Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed waa sidan:

- 1) In ay Hay'adaha Garsoorka u gudbiso qof kasta oo eedeysane ama dembiile ah oo ay maxkamad ama Boliiska Caalamiga ah ay u soo gudbiyaan, amase qof la qabtay isagoo fal-dembiyeed gacanta kula jira.
- 2) Heysashada iyo isticmaalka hub u gaar ah oo ah nooca fudud oo uu sharcigu u oggolyahay, lana diiwaangaliyey oo lagu ilaalinayo nafta hawl-wadeennada Hay'adda iyo gudashada waajibaadkooda shaqo;
- 3) In ay ka hawlgasho gudaha dalka, xuduudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya safaaradaha iyo Qunsuliyadaha Soomaaliya ay ku leedahey dalalka dibadda, iyadoo si mideysan ugu shaqeynaysa Sharcigan.
- 4) Bixinta, cusbooneysiinta iyo la noqoshada noocyada kala duwan ee baasaboorrada JFS si waafaqsan Sharci gaar ah oo soo saaro Baarlamaanka JFS.
- 5) Bixinta, Diidmada, Laalista iyo kala noqoshada noocyada kala duwan ee oggalaashiyaha dal ku galka (Visa-ha) JFS.
- 6) Bixinta iyo baabi'inta oggalaashaha dalku joogga JFS
- 7) Bixinta iyo baabi'inta noocyada kala duwan ee oggolaashaha degenaaanshaha JFS.
- 8) Bixinta oggolaashaha guryo-noqodka "Go Home-ka" ee la siiyo muwaadiniinta ku sugan dalka dibaddiisa ee aan haysan baasaboora shaqeynayo Sida ku cad lifaaqa 2aad ee sharcigan .
- 9) Musaafurinta ajaanibta iyo hakinta safarka socdaaleyaasha xaaladaha uu jideynayo sharcigu.
- 10) Qabashada awoodaha kale ee shuruucda kale ee dalku siinayaan hay'adda.

**Qodobka 10aad:
Sugidda Amniga Shaqada iyo Xarumaha Hay'adda**

- 1) Taliyaha Boliiska Federaalka ayaa soo asteynaya Cutub gaar ah oo la shaqeynaya Hay'adda;
- 2) Cutubka gaarka ah ee Ciidanka Booliska Soomaaliyeed ee loo asteeyay Hay'adda, waxay ku shaqeynayaan awoodda, amarrada maamul iyo hawlgelinta Agaasimaha Guud ee Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed.
- 3) Waxayna gudanayaan;
 - a. Sugidda Amniga Xarumaha, hawl-wadeennada iyo madaxda Hay'adda;
 - b. In ay Howlwadeennada Hay'adda kala howlgalaan Ilaalinta, gaaf-meerka iyo



- kontoroolka bar-xuduudeedyada dalka;
- c. Fulinta go'aannada iyo amarada hay'adda ee la xariira; qabashada ee deysanayaasha iyo horgeynta Cadaaladda, iyadoo u maraya hab-raacyada sharci ee dalka.

Qodobka 11aad:
Howlgalka

Hay'addu waxay ka hawlgashaa dhammaan JFS, waxayna leedahay:

- 1) Saraakiil gudanaysa waajibaadkooda heer Federaal.
- 2) Hannaan maamuus iyo labbis u gaar ah oo ay ku xardhan yihiin astaanta Hay'adda.
- 3) Saraakiil u tababaran sugidda iyo gaafmeerka dhaqdhaqaaqa xuduudaha isla markaana haysta hubka fudud iyo gaadiid ku qalabeysan aaladaha socdaalka

Qodobka 12aad:
Ilaalinta Hufnaanta Shaqo ee Hay'adda

Hay'addu waxay leedahay hab-dhaqan hufan oo ku saleysan shaqo wanaag sida;

- 1) Ilaalinta mabaadi'da aasaasiga ah ee hufnaanta iyo shaqo wanaagga hay'adda
- 2) Dhowrista iyo u-hoggaansanaanta hab-raacayada sharcigan, sharciyada kale ee dalka iyo siyaasadaha gaarka ah ee Hay'addu leedahay.
- 3) Wada-shaqeynta iyo ilaalinta hannaanka kala sarreynta shaqo ee Hay'adda.

CUTUBKA LABAAD:
QAAB-DHISMEEDKA IYO HAB-MAAMULKA HAYA'ADDA

Qodobka 13aad:
Qaab-dhismeedka Hay'adda

Qaab-dhismeedka Hay'addu wuxuu ka kooban yahay laba qeybood oo kala ah Socdaalka iyo Jinsiyadda, wuxuuna maamul ahaan u dhisan yahay sida soo socota:

- 1) Hal Agaasime Guud;
- 2) Labo Agaasime Guud Ku-xigeen oo kala ah:
 - a. Agaasime Ku-xigeenka Socdaalka; iyo
 - b. Agaasime Ku-xigeenka Jinsiyadda.
- 3) Agaasime-Waaxeedyo,
- 4) Agaasime Laameedyo;
- 5) Madax xafiisyo;
- 6) Kormeerayaal;
- 7) Uqaybsanayaal(attachce)



Qodobka 14aad:
Shuruudaha Magacaabista Agaasimaha Guud iyo Ku-xigeennada

Qofka loo magacaabaayo Agaasimaha Guud ama Ku-xigeennada Hay'adda waa in uu buuxiyo shuruudaha soo socda:

- 1) In uu yahay Somali Muslim ah;
- 2) In ay da'diisu ka yareyn 30 (soddan) sano;
- 3) In uu dhimirkiisu dhan yahay;
- 4) In aan maxkamadi ayna ku xukumin xukun Maxkamadeed oo gaaraya shan sano.
- 5) In uu haysto shahaado Jaamacadeed ama in uu leeyahay khibrad la xariirta amniga ama arrimaha socdaalka oo aan ka yarayn 5 (shan) sano

Qodobka 15aad:
Magacaabista Agaasimaha Guud iyo Ku-xigeennada

- 1) Magacaabista Agaasimaha Guud ee Hay'adda waxaa soo jeedinaya Wasiirka, waxaana ansixinaya Golaha Wasiirrada, kaddib waxaa Xeer Madaxweyne ku magacaabaya Madaxweynaha JFS si waafaqsan Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka.
- 2) Magacaabista Ku-xigeennada Agaasimaha Guud waxaa soojeedinaya Wasiirka, waxaana ansixinaya Golaha Wasiirrada.

Qodobka 16aad:
Xilka iyo Awoodaha Agaasimaha Guud

Agaasimaha Guud waa Madaxa iyo hoggaanka ugu sarreeya maamulka hay'adda, wuxuuna mas'uul ka yahay waajibaadka fulineed ee hawlaha hay'adda, si waafaqsan Sharcigan, Xeer Nidaamiyeyaasha hay'adda iyo shuruucda dalka, wuxuuna yeelanayaa awoodaha iyo waajibaadyada hoos ku qoran:

- 1) Ilaalinta awoodaha iyo mas'uuliyadda qaab-dhismeedka Hay'adda ee ku cad Qodobkan iyo Qodobka 13aad ee Sharcigan;
- 2) Maaraynta, isku-duwidda iyo kormeerka hawlaha hay'adda iyo hawladeenadeeda si waafaqsan sharcigan iyo sharciyada kale ee JFS;
- 3) Isagoo la-tashanaya Wasiirka Wasaaradda, wuxuu diyaarinayaa istiraatiijiyado cad oo kor loogu qaadayo hawlaha hay'adda;
- 4) Xiriirka hawlaha adeegga ee kala dhaxeeya hay'adaha dawladda iyo kuwa caalamiga ah.
- 5) Saxiixa heshiisyada ay hay'addu kula galeyso heerkeeda Hay'adaha Caalamiga ah ama Hay'adaha dhigeeda ee Dalalka kale, kadib oggolaanshaha Wasiirka Wasaaradda;
- 6) Magacaabista iyo awoodsiinta Agaasime waaxcedyo, Madaxda laameeydo iyo u-qeybsaneyaal ka hawlgalaya Safaaradaha iyo Qunsuliyadaha Guud JFS;
- 7) Magacaabista iyo awoodsiinta Guddiyada hawl-fulineed ee hay'adda;
- 8) Meel-marinta ku dhaqanka qorshaha miisaaniyadda iyo diyaarinta Miisaaniyad sannadeedka Hay'adda isagoo la-tashanaya Wasiirka.
- 9) Isugu yeerista kulamada kala duwan ee maamulka Hay'adda, shir guddoomintooda iyo talo-siintooda.



Qodobka 17aad:
Xil ka-qaadista Agaasimaha Guud iyo Ku-xigeennada

Xil ka-qaadista Agaasimaha Guud iyo Ku-xigeennadiisa waxaa loo marayaa isla habraacii loo maray magacaabistooda, sida Waafaqsan Qodobka 15aad ee Sharcigaan.

Qodobka 18aad:
Xilka iyo Waajibaadka Ku-xigeennada Agaasimaha Guud

Xilka iyo waajibaadka Ku-xigeennada Agaasimaha Guud waa sidan soo socota;

- 1) Qabashada shaqooyinka la xiriira Socdaalka iyo Jinsiyadda, iyadoo mid walba uu qeyb mas'uul ka yahay.
- 2) Qabashada hawlaha kale ee shaqo ee uu u idmo Agaasimaha Guud ee hay'adda;
- 3) Buuxinta kaalinta Agaasimaha Guud si ku-meel-gaar ah, marka uu ku maqan yahay fasax ama shaqo dibbedda ah ama ay la soo gudboonaato xaalad caafimaad oo u saamixi karin gudashada xilkiisa, isagoo qoraal ku caddeynaya labada ku-xigeen midka kaalintiisa buuxinaya inta uu maqan yahay.
- 4) Haddii Agaasimaha Guud ay ku timaado geeri, ama xaalad caafimaad darro joogta ah oo dhaqtar soo caddeeyey taas oo aan u saamaxeynin gudashada waajibkiisa.
- 5) Ku-xigeenka Agaasimaha Guud ee Socdaalka ayaa noqonaya sii hayaha xilka Agaasimaha Guud inta laga macaabayo Agaasimaha Guud si waafaqsan Sharcigan.

Qodobka 19aad:
Waajibaadka U-qeybsaneyaasha Hay'adda Socdaalka

U-qeybsaneyaashu, waxay u xil-saaran yihiin

- 1) U-qeybsanaha Hay'adda wuxuu maamul ahaan hoos tagayaa Safiirka ama Qunsulka Guud;
- 2) U-qeybsanayaashu Waxay u xilsaaran yihiin bixinta dhammaan noocyada kala duwan ee documentiga socdaalka marka uu helo ogolaanshaha Safiirka ama Qunsulka safaaradda.
- 3) Wuxuu fulinayaa Shuruucda iyo Habraacyada ay Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda.

CUTUBKA SADDEXAAD:
HAWL-WADEENADA HAY'ADDA IYO WAXYAABAHA KA REEBAN

Qodobka 20aad:
Hawl-wadeennada Hay'adda

- 1) Hawlwadeennada Hay'adda waxay noqonayaan saraakiil iskugu jira ciidan iyo rayid si isku dheelitiran rag iyo dumar una tababaran fulinta hawlaha hay'adda.
- 2) Hawl-wadeennada hay'addu waxay leeyihiin xuquuq iyo daryeel gaar ah oo aan lagu xad-gudbi karin, waana saraakiil Dowladeed waxaana lagu maamuli doonaa Xeer nidaamiye ugaar ah oo uu soo saaro Wasiirka Wasaaradda.



Qodobka 21aad:
Shuruudaha Hawl-wadeennada Hay'adda

Qofka ka mid noqonaya hawl-wadeennada Hay'adda waa in uu yeecshaa shuruudahan soo socda:

- 1) In uu yahay muwaadin Soomaali oo Muslim ah;
- 2) In Da'diisu aysan ka yareyn siddeed iyo toban (18) sano;
- 3) In uu maskax ahaan u caafimaad qabo;
- 4) In aysan maxkamad ku xukumin fal-dambiyeed ciqaabeed; shantii (5) sano ee u danbeysay;
- 5) In uu soo dhamaystirtay muddadii tababarka iyo tijaabada ee ka mid noqoshada hawl-wadeennada rasmiga ah ee Hay'adda.
- 6) In uu haysto uga yaraan shahaado Dugsi Sare marka laga reebo shaqaalaha qabanaya shaqooyinka hoose.

Qodobka 22aad:
Xuquuqda Asaasiga ah ee Hawl-wadeenada Hay'adda

Howlwadeen kasta oo ka tirsan Hay'adda waxa uu leeyahay xuquuqda asaasiga ah ee hoos ku qoran iyo xuquuqdii kale ee sharcigaan, xeer-nidaamiyayaasha, ama xeer-hoosaadyada Hay'addu siiyaan:

- 1) Mushaar bille ah oo ku jaango'an darajadiisa shaqo;
- 2) Gunnooyin uu ku muteysanayo hadba nooca, ahmiyadda, iyo xilka uu Hay'adda u hayo;
- 3) Sarkaalka Hay'adda, wuxuu leeyahay fasax sanadeed bil ah oo uu qaadanayo mushaarkiisa;
- 4) Daryeel caafimaad oo lagu qeexi doono hab-raac gaar ah;
- 5) Fasaxyada maalmaha ciidaha ama feestooyinka qaran ama baddal u dhigma;
- 6) Dallacsiin marka uu muteysto sida xeer-nidaamiyayaasha Hay'addu tilmaamayaan;
- 7) In uu helo xuquuq kasta oo uu ku muteysto Sharcigaan, xeer-nidaamiyayaasha, xeer-hoosaadyada iyo go'aamada maamul ee madaxda Hay'adda.
- 8) Howlwadeenada Hay'adda ee Rayidka ah waxay ku xuquuq yihiin shaqaalaha rayidka ah ee dowladda federaalka, halka howlwadeenadda ciidanka ahna ay ku xuquuq yihiin ciidamadda ay ka tirsanyihiin.

Qodobka 23aad:
Waxyaabaha ka Reebban Hawl-wadeenada Hay'adda

Dhammaan Hawl-wadeenada Hay'adda ee heer kasta waxaa ka reebban:

- 1) Kamid-noqoshada xisbiyada siyaasadeed;
- 2) Faafinta iyo la-wadaagista xogta shaqada Hay'adda dhinac kale oo aysan khuseyn;
- 3) Isticmaalka noocyada maandooriyaha.
- 4) Ka faa'iideysiga duruufaha muwaadiniinta iyo macaamiisha kale, iyadoo la isticmaalayo awoodda Hay'adda; iyo
- 5) Qabashada ama ka-mid-noqoshada shaqo kale oo ka hor-imaanaysa shaqada uu u hayo Hay'adda.



Qodobka 24aad:
Anshax-marinta Hawl-wadeenada Hay'adda

- 1) Hay'addu waxey yeelanaysaa Xeer-hoosaad Anshax iyo Guddiga Anshax-marin.
- 2) Hawl-wadeen kasta oo ka tirsan Hay'adda oo gala fal liddi ku ah waxna u dhimaya anshaxa iyo dhaqanka hay'adda waxaa loo cuskanayaa Sharciyada ciidanka iyo Sharciga Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda.

Qodobka 25aad:
Waayidda Xubinnimada Hay'adda

Hawl-wadeenada Hay'adda, waxay xubinnimadooda ku waayi karaan Arrimaha Soo Socda:

- 1) Inuu ka ruqseysto shaqada;
- 2) In Maxkamad ay ku xukunto xukun Maxkamadeed oo gaaraya shan sano.
- 3) Xubinta oo aqbasho xil Kale
- 4) Xil gudasha la'aan si waafaqsan habraaca Xeer nidaamiyaha Hay'adda;
- 5) Geeri ku timaada;

CUTUBKA AFARAAD:
MIISAANIYADDA, HANTI-DHOWRKA IYO WARBIXIN
SANADEEDKA HAY'ADDA

Qodobka 26aad:
Miisaaniyadda Hay'adda

- 1) Hay'addu, waxay yeelanaysaa miisaaniyad u gaar ah oo kamid ah miisaaniyadda guud ee Qaranka.
- 2) Hay'addu, waxay sanad kasta soo diyaarinaysaa miisaaniyad-sanadeed waxayna u gudbinaysaa Wasaaradda Maaliyadda.
- 3) Hay'addu, waxay u madaxbannaan tahay maamulidda miisaaniyadda loo qoondeeyay si waafaqsan shuruuca maamulka maaliyadda guud ee u degsan Dalka.

Qodobka 27aad:
Xisaabaadka iyo Hantidhowrka

Xafiiska Hanti-dhawraha Qaranka ayaa u xilsaaran in uu faafreeb iyo dabagal ku sameeyo miisaaniyadda Hay'adda iyo sida loo isticmaalay.

Qodobka 28aad:
Warbixin Sanadeedka Hay'adda

Hay'addu, waxay sanad walba dhamaadkiisa bisha Diseembar, soo bandhigeysaa warbixin sanadeed ay ku caddeynayso wax-qabadii sanadkii dhamaaday, iyadoo u gudbineysa Wasiirka Wasaaradda.



**CUTUBKA SHANAAD:
QODOBO QUBANNE AH
Qodobka 29aad:
Xeer Nidaamiyeyaasha Hay'adda**

Hay'addu waxay yeelanaysaa Xeer-nidaamiyeyaal lagu dhaqan-gelinayo sharcigan, waxaana soo saaraya Agaasimaha Guud ee Hay'adda oo u gudbinaya Wasiirka, waxaana lagu soo saarayaa Xeer Wasiir.

**Qodobka 30aad:
Baabi'in**

Sharcigani wuxuu baabi'inayaa Sharci kasta oo ka hor-imaanaya ama aan la socon karin oo la xiriira arrimaha socdaalka iyo qeybta hay'adda ka khuseysa jinsiyadda.

**Qodobka 31aad:
Dhaqangal**

Sharcigani wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka JFS, saxiixana Madaxwaynaha JFS, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.



**Lifaaqa laad:
Astaanta Hay'adda**



Lifaaqa 2aad:
Warqadda Dal-ku-noqoshada "Go-home"



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
TEMPORARY TRAVEL DOCUMENT

Tar/Date:	<input type="text"/>	<input type="text"/>	<input type="text"/>	PHOTO
Lambar/TD No:	<input type="text"/>	<input type="text"/>	<input type="text"/>	
Magaca / Full Name:				
Magaca Honyo / Mothers Name:				
Jinsiga / Gender:				
Tariikhda Dhalashada / Date of birth:	<input type="text"/>	<input type="text"/>	<input type="text"/>	
Goobta Dhalashada/ Place of birth:				
Jinsiyadda/Nationality:				
Calamad Wajiga/ Face marks:				
Cinwaanka dalka uu deganyahay/ Address in the country of residence:				
Tariikhda la hixisay / Date of issue:	<input type="text"/>	<input type="text"/>	<input type="text"/>	
Hay'adda hixisay / Issuing Authority:				
Mudada ay ansax tahay / Valid until:				

Warqaddan waxaa lagu gali karaa oo kali ah xuduudaha dalka jamaahiyadda Federaalka Soomaaliya.

This TTD for use only to travel back to the Federal Republic of Somalia

هذه الوثيقة السفر المؤقتة صالحة للعودة إلى جمهورية الصومال الفيدرالية فقط

Signature: _____ Date:

Immigration and Naturalization Directorate, Moha Al Mukarama Road, Mogadishu, Somalia
Phone: +252 61 501 4055, Email: immigration@fdr.gov.so www.immigration.gov.so

